

# SIDA LOO CODSADO AQOONSI-WADAAGA HAY'ADDA Isku-darka Saacaddaha Dhan ee Shaqadda

## U-qalmitaanka

Waxa laga yaabaa inaad u qalanto kordhinta Isku-darka Saacadaha ee Shaqada (Cumulative Career Hour, CCH) iyo mushaharkaaga aasaasiga ah haddii:


- Waxaad uga shaqeysay sidii shaqaale daryeel toos ah hay'ad bixisa daryeelka lagu dhex bixiyo guriga oo qandaraas kula jirta Medicaid
- Waxaad bixin kartaa dukumeenti la xaqiijin karo saacadaha aad u shaqeysay sidii ahaan shaqaale hay'adeed oo ku bixinayay daryeel toos ah guriga taasoo qandaraas kula jirta Medicaid
- Taariikhahaada shaqada iyo saacadaha adeeg-bixinta ee wakaalad la lahaatay waa Luulyo 1, 2017 ama wakhti ka danbeeya

Wakhtiyada Kama Dambaysta ah ee ay Tahay Inaad Soo Gudbiso Codsigaaga:

- Haddii ay ku shaqaaleysiiyay CDWA ka dib Juun 1, 2022, ku soo gudbi codsigaaga 60 maalmood gudahooda kadib taariikhda marka lagu siiyo Aqbalaada Bixinta Daryeelka

## Si aad u Codsato Saacadaha CCH ee Aqoonsi-wadaaga Hay'adda

1. Gal [bogga internetka DirectMyCare](#) ee CDWA
2. Markaad joogto shaashada My Dashboard (Dhaashboodh-kayga), guji badhanka **Workday (Shaqada Maalinta)** si aad u tagto boggaaga koowaad ee Workday.  
*\*Haddii aad tagtid bogga gelitaanka, geli isla magaca adeegsadaha iyo lambar sireedka ee loo isticmaalay in lagu galo [bogga internetka DirectMyCare](#).*
3. Ka raadi barta raadinta qaybta ugu sarreeysa ee shaashadda oo ku qor samee codsi.
4. Dooro **Create Request Task (Hawsha Samee Codsii)**.
5. Wax soo bixida Create Request (Samee Codsii), isticmaal tasmada liiska hoos u dhaca si aad u doorato **All (Dhamaan)**. Kadibna dooro **CCH (Cumulative Career Hours) Review Request (Codsiga Dib u eegista ee Isku-darka Saacadaha Shaqada)**. (*Jaantuska 01*)
6. Guji **OK**. (*Jaantuska 01*)



Jaantuska 01

### What to Do:

- Complete the information requested below.
- Upload your agency-worked documentation in the Attachment section.
- Click **Submit** when finished.

**CDWA will respond within 10 business days with an approval, denial or additional questions.**


Jaantuska 02

7. Shaashada waxaa ku yaala tilmaamo waxtar leh. Dib u eeg kuwan ka dib buuxi goob kasta oo loo baahan yahay oo ku taal shaashadda si aad uga hortagto daahitaanka habeynta codsiga. (*Jaantuska 02*)

## Dukumeentiyada La Aqbali Karo

Waa inaad ku soo lifaaqdaa caddaynta shaqo-bixiyaha ee saacadaha iyo taariikhda shaqaaleynta.

8. Guji **Select Files (Dooro Faylasha)** si aad uga soo geliso dukumeentiyadaada ka socda hay'adda aad u soo shaqeysay kombayutarkaga ama moobeelka gacanta ee aad doorbidayso ee ku jira gudaha qeybta **Attachments (Lifaaqyada)**. (Jaantuska 03)



Jaantuska 03

9. Kadib markaad soo geliso dukumeentiga, guji Submit (Gudbi) si aad u gudbiso Saacadahaaga CCH. (Jaantuska 03)
10. Waxaad heli doontaa iimayl xaqiijinaya codsigaaga CCH.

\* CDWA waxay kaga jawaabi doontaa 10 maalmood oo shaqo gudahood ogolaansho, diidmo, ama weydiinta su'aalo dheeraad ah.